

# Waa maxay kansar?

Page 1 of 1



Kansarka waa cudur ku dhaca unugyada. Jirka biniaadamka waxa uu ka sameysan yahay malaayiin unugyo ah. Jirkayagu mar kasta waxa ay sameeyaan unugyo cusub: saas baan ku kornaa, ku bedelma unugyada jeexma ama bogsiiya unugyada dhaawaca ka dib.

Hide sidayaashu (genes) waa qeybaha unuga u sheegta waxa uu qabanayo. Qaar hida sidayaasha ayaa u sheega unuga iney istarmiyaan.

Kansarka waxa keena dhaawac gaara hida sidayaasha. Hida sidayaasha siyaabo badan bey wax u gaari karaan baa'adeena sida cadceed aab u badan, dhuuqida sigaarka ama waxaan cuno. Marmarka qaar hida sidayaashaas dhaawaca wuxuu waalidka u gudbin karaa ilmihiiisa.

Hida sidayaasha caadiga waxay unugyada u sheegaan markay tarmayaan iyo markey dhimanayaan. Taasi ayaa ka dhacda jirkaaga markasta. Lakiin hida sidayaasha wax gaareen marmar waxay unugyada u sheegaan inay si aada u tarmaan ama joojiyaan dhimashada markey dhiman lahaayeen. Unugyadan saa'idka ah waxay wadaan tarankoodii oona laga yaabaa in ay sameeyaan buruq oo lagu magacaabo tumour. Buruqda qaar ayaa la dareemaa qaarna lama dareemi karo. Buruqyada qaar waa benign, taasoo

macnaheedu yahay ma ay aha kansar. Qaarna waa malignant, oo ay macnaheedu tahay waa kansar.

Marka hore kansarka waxa uu ku koraa meesha uu ka bilowdo. Meeshaas waxaa lagu magacaabaa kansarka koowaad. Kansarka koowaad waa uu weynaan karaa kaasoo yeelan kara calaamado.

Ka dib, unugyada kansarka qaar waa ay ka tagi karaan kansarka koowaad oo ay u gudbi qeybaha kale ee jirka. Waxay ku safaaran habdhiska dhiiga iyo qanjirada. Unugyadani waxa ay ku sameyn karaan kansaro cusub qeybaha kale ee jirka. Kuwaan waxaa lagu magacaabaa kansarka labaad ama metastases. Marmar qofku ma dareemo in uu qabo kansar ilaa uu helo calaamadaha kansarka labaad.

Kansarka waxa uu ka soo bixi karaa meel kasta oo jirka ah. dhiiga iyo qanjirada waa ay yeelan karaan kansar.

Qofna kama "qaadi" karo kansar qof kale. Dad badan ayaa qaada kansar in ka badan barna waa ay ka badbaadeen. kansarka waa uu ku dhacaa dadka ka yimid wadan kasta, jinsiyad kasta iyo diin kasta. Wuxuuna saameeyaa sadaxdii qofba qof dadka Australia.

Qof kasta oo qaba kansar waxa uu istaahilaa taageero iyo daawada ugu fiican ee taala.


## ► Somali

What is cancer?


**Qadka warbixinta kansarka:**

- **Somali**  
**(03) 9209 0169**
- **English**  
**131120**

## Siduu =ku bilowdo kansarka



## Sida uu u fido kansarka



1 Rathdowne Street  
Carlton Vic 3053  
Australia  
Telephone: 61 (0)3 9635 5000  
Facsimile: 61 (0)3 9635 5270  
enquiries@cancervic.org.au  
www.cancervic.org.au

January 2004